Warqada xaqiiqda

# Cabashooyinka waafaqsan Xeerka Takoorka Qoomiyadeed

## Waa maxay Xeerka Takoorka Qoomiyadeed?

Xeerka Takoorka Qoomiyadeed (The *Racial Discrimination Act 1975)* (Cth) (the RDA) wuxuu ka dhigayaa wax sharciga ka soo horjeeda in laguula dhaqmo si aan cadaalad ahayn sababtoo ah qoomiyadaada, midabkaaga, meeshaad ka soo jeedo, dhalashadaada ama isirkaaga asalka ah ama xaaladaada soogaleetinimo.

Waxay sidoo kale ka dhigeysaa naceybka jinsiyadeed ee sharciga ka soo horjeeda.

## Goormaa tan la isticmaali karaa?

Waxaad isticmaali kartaa RDA inaad ka hesho macaamil cadaalad ah goobo badan oo ah nolosha dadweynaha:

- **Shaqo** – helida shaqada, shuruudaha iyo waxyaalaha shaqada, tababarka, dalacsiinta, ceyrinta.
- **Waxbarashada –** diiwaangelinta ama wax ka barashada dugsiga gaarka ah ama dawlada, kuliyada ama jaamacada.
- **Hoyga** – kireysiga ama iibsashada guri ama shuqad.
- **Helida ama isticmaalida adeegyada** – sida ceymiska ama bangiga, adeegyada ay bixiyaan wasaaradda dawlada, gaadiidka ama adeegyada isgaarsiinta, adeegyda xirfadeed sida kuwa ay bixiyaan sharci yaqaanadu, dhakhaatiirta ama kuwa xirfad la yaasha ah, adeegyada ay bixiyaan makhaayadaha, dukaamada ama goobaha madadaalada.
- **Isticmaalida goobaha dadweynaha** – sida baaggaga, xafiisyada dawlada, makhaayadaha, hoteelada ama xarumaha dukaameysiga.

## Waa maxay takoorida jinsiyadeed?

Takoorida jinsiyadeed waxay dhacdaa marka qof loola dhaqmo si ka asxaan yar qof kale oo ay isku xaalad yihiin sababtuna tahay jinsiyadooda, midabka, meeshay ka soo jeedaan, dhalashadooda ama asalka jinsiyadooda ama xaaladooda soogalootinimo. Tusaale, waxay noqonaysaa 'takoorid toos ah' haddii wakiilka guryuhu uu kuu diido inaad kireysato guri qof sababtoo ah inay ka soo jeedaan asal jinsiyadeed gaar ah ama midabka maqaarkooda.

Takoorida jinsiyadeed sidoo kale waxay dhacdaa markuu jiro xeer ama qorshe qof walba u siman yahay laakiinse ku leh saameyn aan cadaalad ahayn dad jinsiyad gaar ah, midab,

meeshay ka soo jeedaan, dhalashadaada ama jinsiyadaadii asalka ahayd ama xaalada soogalootiga. Tan waxaa la yiraahdaa 'takoorida jinsiyeed'. Tusaale, waxaa laga yaabaa inay tahay takoorid aan toos ahayn haddii shirkadu ay ku tiraahdo shaqaalaha waa inaysan xiran koofiyado ama waxyaalaha kale ee madaxa loogu xirto shaqada maadaama tan laga yaabo inay keento saameyn aan cadaalad ahayn dadka ka soo jeeda asalka qoomiyadeed/jinsiyadeed.

## Waa maxay naceybka qoomiyadeed?

Sharciga ayey ka soo horjeedaa inaad ku sameysid wax dadweynaha hortooda oo ku saleysan qoomiyada, midabka, dhalashada ama asalka jinsiyadeed ee qof ama koox dad ah oo u eg inay **u gafeyso, caayeyso, ceebeynayso ama cabsigelinayso**.

Tusaalayaasha naceybka qoomiyadeed waxaa ka mid noqon kara qoomiyad ahaan:

- waxyaalo gaf ah oo interneetka ah, oo ay ku jiraan e-forums, baloogyada, goobaha isgaarsiinta bulshada, iyo goobaha fiidyoowga lagu wadaago.
- faallada gafka ah ama muuqaalada daabaacadaha sida wargeyska, joornaalada, waraaqaha yar yar ama waraqaha xayeysiinta
- hadalada gafka ah ee bannaan bahyada dadweynaha
- faallada waxyeelada leh ee goobaha dadweynaha. Sida dukaanka. Goobta shaqada , baagga, gaaddiidka dadweynaha dushooda ama dugsiga.
- Faallada waxyeelada leh ee munaasabadaha cayaaraha ee ciyaartoyda, daawadayaasha, tababarayaasha ama saraakiisha.

## Markee bay dabeecada gefka ah ee ku saleysan qoomiyadu aysan sharciga ka soo horjeedin?

RDA waxay ujeedadeedu tahay inay isudheelitirto xuquuqda aad si xor ah loogu wada xiriiri lahaa ('xoriyada hadalka') iyo xuquuqda ah inaad noolaato adoo xor ka ah naceybkka qoomiyadeed. RDA waxay waxyaalahan soo socdaa kama soo horjeedaan sharciga haddii ay isku raacaan **"oo loo sameeyo si macquul ah iyo niyad wanaag"** si:

- **Jilitaan ama shaqo fanned** – tusaale, riwaayada uu jilaa sheegay qaabab gafeed qoomiyadeed.
- **Qoraal, daabacaad, ka wada hadal ama dood loo sameeyey ujeedooyin waxbarasho sare oo dhab ah** – tusaale, ka wadhadlida iyo ka doodista qorshaha dadweynaha sida socdaalka, dhaqabama badan ama qorshayaasha khaaska ah ee kooxaha gaarka ah.
- **ka sameynta warbixinta saxda ee cadaalada arin danta dadweynaha ah** – tusaale, warbixinta cadaalada ah ee wargeyska ku saabsan falgafeed qoomiyadeed.
- **sameynta faallo cadaalad ah**, haddii faalladu ay tahay caddeynta waxa qofku uu dhab ahaan rumeysan yahay. .

## Maxaan sameyn karaa haddii ay isoo marto naceybka qoomiyadeed ama takooritaan?

Waxaa laga yaabaa inaad si toos ah ula soo qaado qofka ama dadka ku lugta leh.

Haddii tani aysan xalin, ama aadan dareemeynin wanaag sameynteeda, waxaad u caban kartaa Golaha Xuquuqda Bani'aadamka Australia. Waxaad sidoo kale soo kaxeysan kartaa qof sida sharci yaqaan, udoode ama ururka shaqaaluhu inay cabashada u gudbiyaan iyagoo ku metelaya.

Waxba kuguma joogto inaad u cabatid golaha.

Cabashadaadu waa inay ahaataa qoraal. Goluhu wuxuu leeyahay foomka cabashada oo aad buuxineysid oo aad soo direysid ama noo soo fakisgareynaysid ama waxaad ku soo diri kartaa cabashada online iyo website keena. Haddii aadan awoodin inaad cabashadaada ka dhigtid qoraal, waan ku caawin karnaa.

Si cabashadaadu ay u noqoto mid sax ah waa inay noqotaa mid aad shakhsi ahaantaada aad si macquul ah aad ugu doodi kartid dhacdada aad dooneysid inaad ka cabatid inay tahay takoorid sharci daro ah waana inaad bixisaa faahfaahin ku filan oo ku saabsan waxaad ku eedaynayso oo ay ku jiraan wixii dhacay, wakhtigii iyo meeshii ay ka dhaceen iyo ciddii ku lug lahayd.

Cabashada waxaa lagu sameyn karaa luuqad kasta. Haddii aad u baahan tahay turjumaan afka ah ama qoraal, waan kuu qaban karnaa tan.

## Xaggee baan ka heli karaa macluumaad dheeraad ah?

Golaha Xuquuqda Bani'aadamka Australia faafaahintiisa xiriirku waa:

**Taleefan**
Adeegga Macluumaadka Qaranka: 1300 656 419 ama (02) 9284 9888
TTY: 1800 620 241 (toll free)
Fakis: (02) 9284 9611

**Boosta**
GPO Box 5218
Sydney NSW 2001

**Online**
Iimyl: infoservice@humanrights.gov.au
Website: www.humanrights.gov.au

Waxaad ku sameyn kartaa cabashada online
www.humanrights.gov.au/complaints_information/online_form/index.html.

Haddii aad dhega la'a dahay ama maqalka wax ka qabtid nagala soo xiriir TTY 1800 620 241. Haddii aad u baahan tahay turjumaanka Auslan ,waan kuu qaban karnaa kan.

Haddii aad indho la'dahay ama araga aad waxka qabtid, waxaan ku bixin karnaa macluumaad qaabab kale markaad soo codsato.

April 2020

## Meelaha kale ee xiriirka cabashooyinka qoomiyad naceybka

Haddii aad saluugsan tahay sheekooyinka warbaahinta gefka leh, isgaarsiinta ama tusmada online ka ah, waxaad u caban kartaa Hay'ada Warbaahinta iyo Isgaarsiinta Australia (ACMA); Guddiga Heerarka Xeyeysiinta ee loogu talagalay xayeysiinta; ama Golaha Warbaahinta Australia ee sheekooyinka wargeyska. Waxaad sidoo kale uga caban kartaa qoraaga ama maareeyaha ururka warbaahinta.

Haddii aad saluugsan tahay wax ku saabsan dabeecada gefka ah ee deriska, waxaad u tegi kartaa Xarunta Caddaalada Bulshada si ay kaaga caawiso in dhibka la xaliyo, ama Wasaaradda Guriyeynta haddii aad ku nooshahay guryaha dadweynaha.

**Haddii laguugu hanjabay shaqaaqo ama si dagaal leh laguu soo weeraray u tag boliiska.**

## Tallada sharci ee guud

Haddii aad ka fekeraysid sameynta cabasho, waxaa laga yaabaa inaad hesho tallo sharciyeed ama la xiriir ururkaaga shaqaalaha. Adeegyada sharciga bulshada ayaa bixin kara tallo bilaash ah oo ku saabsan dhibka iyo takoorka. Faahfaahinta xiriirka ee xarunta sharciga bulshada ee kuugu dhow waxaa laga heli karaa www.naclc.org.au/directory.

**Afeef: Macluumaadka warqadaan xaqiiqda waxaa loola jeedaa oo kaliya hagitaan. Ma aha bedelkii tallo sharciyeed.**